

Xeerka Caawimaadda Dhaqaalaha ee OHSU Health

Soo-koobid ah Luqad Fudud

Ma u baahan tahay caawimaad xagga bixinta kharashka daryeelkaaga?

Haddii aad u baahan tahay caawimaad ku saabsan biilkaaga caafimaadka ee OHSU Health, waxaad haysataa xulashooyin. Haddii aad ka walwalsan tahay bixinta biilashaada caafimaad, fadlan nala soo xiriir. Haddii ay suurtagal tahay, fadlan codso caawimaad dhanka dhaqaalaha ah **ka hor** inta aadan helin daryeelka.

Yaa heli kara caawimaad ku saabsan biilasha caafimaadka?

U-qalmitaanka kaalmada si aad ugu bixiso biilasha caafimaadka waxay ku xiran tahay dakhligaaga, caymiska caafimaadka, tirada xubnaha qoyskaaga, halkaad ku nooshahay iyo nooca daryeelka. Wixi faahfaahin ah ka eeg Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha.

Intee in le'eg oo caawimaad ah ayaan heli karaa?

Adeegyada xaaladaha degdegga ah iyo kuwa caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah, OHSU Health waxay bixisaa:

- Daryeel **lacag la'aan ah** haddii dakhliga qoyskaaga ka hor inta aan laga jarin canshuurta uu ka hooseeyo 300% heerka saboolnimada ee Federaalka.
- Qiimo dhimis dhan 65% haddii dakhliga qoyskaaga ka hor inta aan laga jarin canshuurta uu u dhexeeyo 300% iyo 400% heerka saboolnimada ee federaalka. Si aad u hesho heerarka saboolnimada ee Federaalka ee hadda jira, booqo aspe.hhs.gov/poverty-guidelines.

Sida loo codsado

Bukaan kasta ama qof u doodaya (sida xubin qoyska ka mid ah) ayaa codsan kara kaalmo dhaqaale wakhti kasta ka hor, inta lagu guda jiro, ama ka dib marka la bixinayo daryeelka. Waxaan baari doonnaa bukaanka ama qofka mas'uulka ka ah biilka. Waxaay u baahan karaan inay buuxiyaan foomka codsiga oo isla markaana ay xaqiijiyaan dakhligooda iyagoo adeegsanaya warqadaha caddeynta mushaharka, warbixinnada canshuurta dakhliga iyo diiwaannada bangiga.

Kaalmada Dhaqaalaha ee OHSU Health waxaa laga heli karaa dhammaan goobaha isbitaallada iyo rugaha caafimaadka, **marka laga reebo khidmadaha dhakhaatiirta ee goobahan:**

- Richmond Family Medicine
- East Portland Family Medicine
- School of Dentistry

Haddii aad qabto su'aalo, u baahan tahay caawimaad, ama aad rabto foomka codsiga ama macluumaad dheeraad ah, la xiriir:

	OHSU	Hillsboro Medical Center
Mareegta	www.ohsu.edu/health/financial-assistance	www.tuality.org/patient-resources/financial-assistance
Telefoonka	503-494-8551	503-494-8551
Si shaqsi ah 8 a.m. –4:00 p.m.	OHSU Patient Financial Services OHSU Hospital 9 th floor 3181 SW Sam Jackson Park Road Portland, OR 97239	Hillsboro Medical Center Patient Financial Services 335 SE 8th Ave. Hillsboro, OR 97123
Boosta ahaan	OHSU Patient Financial Services Mail Code: RPB07 3181 SW Sam Jackson Park Road Portland, OR 97239	OHSU Patient Financial Services Mail Code: RPB07 3181 SW Sam Jackson Park Road Portland, OR 97239

Luqadaha kale

- Haddii aad u baahan tahay luuqadaha Fiyatnaamiiska, Ruushka, Carabiga, Shiinayska, Kuuriyaanka ama Isbaanishka, booqo www.ohsu.edu/health/financial-assistance-programs si aad u hesho Xeerka Kaalmada Dhaqaale, foomka codsiga iyo soo-koobidan.
- Wixi ku saabsan dhamaan luqadaha kale, wac 503-494-8551. Waxaan ku xiriirin karnaa turjumaan.

Hababka kale ee aan kugu caawin karno

OHSU Health waxay bixisaa qorshayaal lacag-bixineed oo aan lahayn kharash dheeraad ah.

- Wixii ku saabsan adeegyada OHSU ama Hillsboro Medical Center, wac 866-617-6855.

OHSU Health waxay kaa caawin kartaa inaad hesho caymis caafimaad adigoo adeegsanaya barnaamijyada heer federaal iyo kuwa gobolka.

- Wixii ku saabsan OHSU, wac 503-494-1671.
- Wixii ku saabsan Hillsboro Medical Center, wac 503-681-1012.